

Uur Ektoobiga

Waa maxay uurka ektoobigu?

Uurka ektoobigu waa xaalad caadi ah, marmarna halis ku ah nololaha oo saameeya 80kii uurba mid. Si fudud haddi loo sheego, waxa loola jeedaa “uur ku samaysma meel ka baxsan meeshiisii caadiga ahayd. Waxay dhacdaa marka ugxanta (ukunta) la bacrimiyey ay qabsato (ay ku dhegto) meel ka baxsan ilmo-galeenka (makaanka). Mararka qaarkood, ukunta la bacrimiyey ayaa laga yaabaa inay meel kale ku dhegto, tusaale ahaan, ugxan -sidaha, afka ilmo -galeenka, caloosha ama nabarka qalliinka Siiseeriyaaan.

Waa maxay sababaha keena uurka ektoobigu?

Haweeney kasta ama qof kasta oo awood u leh inay uuraysato kuna jirta da'da dhalmada, galmo ahaanna firfircoon ama qaadanaysa daaweynta tiknoolajiyadda taran-caawimeedka (ee af-Ingriisiga loo soo gaabiyo ART), waxay halis ugu jirtaa uurka ektoobiga. Badanaa sababta marna lama go'aamin karo. Si kastaba ha ahaatee, uurka ektoobigu waxa uu badanaa dhacaa haddii aad qabtid xaalado caafimaad daro sida cudurka caabuqa miskaha, buro-biyoodka ilmo-galeenka ama qalliin lagaaga sameeyay ugxan mareenka. Kiniinka yar ee lagaga hortaggo uurka degdegga ah iyo Aaladda Lagu Rakibo Ilma-Galeenka (ee af-Ingriisiga loo soo gaabiyo IUD) ayaa sidoo kale gacan ka geysan kara khatarta aad ku yeelan karto uur ektoobig ah. Uurka ektoobigu ma aha mid la iska dhaxlo oo kuma xirna dhicis ama ilmo iska soo ridid.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in uurka ektoobigu uusan adiga khaladkaaga ahayn oo aysan jirin wax aad sameyn kartay si aad uga hortagto in uu dhaco.

Sidee loo daaweeyaa?

Waxaa jira saddex siyaabood oo lagu daaweeyo uurka ektoobiga iyadoo ku xiran xaaladdaada:

- Maareynta filashada (ka dhursugida iyo sugitaanka si loo eego haddii uurku iskii iskaga haggaaqo iyada oo aan wax ka qabasho caafimaad ama qalliin lagu samayn)
- Maareynta daawada (ku duritaanka muruqa daawo loo yaqaan methotrexate)
- Maareynta qalliinka (qalliin la sameeyo adiga oo suuxsan).

Haddii lagugu ogaado inaad leedahay uur ektoobiga oo aad xasilloon tahay, garaaca wadnaha iyo cadaadiska dhiigguna ku jiraan xadka caadiga ah, oo uusan jirin dhiig-bax culus ama xanuun daran, iyo haddii aysan jirin calaamado dawakhaada ama suuxdina, dhakhtarkaagu wuxuu awoodi doonaa inuu kaala hadlo xulashooyinka daaweynta ee kala duwan.

Nasiib darro se, dadka qaarkood ma laha calaamado ay soo bandhigaan xilliga qiimaynta ka dib markii ay weli jiraan fursado la heli karo oo daaweyn ah. Haddii aad xoog u dhiigayso, aad u xanuunsanyo, ama aad leedahay calaamado dawakhaada ama suuxdina, dhakhtarkaagu wuxuu u badan yahay inuu kuu soo jeediyo qalliin baadhitaan oo la yidhaa laproscopy kaasi oo ah qalliin daloola oo u oggolaanaya inay eegaan calooshaada dhexdeeda si ay u arkaan waxa ka dhacaya.

Macluumaad intas kasi faahfaahsan, fadlan fiiri warqada (daha) ku habboon ee shaxaya ikhtiyaarka daaweynta.

Maxaa ku dhici doona uurka ektoobiga ah?

Waa wax laga xumaado, inaysan suurtoagal ahayn in uurka ektoobiga ah loo raro ilma-galeenka. Xaalado badan, uurka ektoobiga ahi si dhakhso ah ayuu ku baaba'aa oo waa la nuugaa ka hor inta caadada la waayin ama ka dib xanuun yar iyo dhiig bax. Xaaladaha noocaas ah, uurka ektoobiga dhif ayaa lagu ogaadaa oo dhicisow ayaa loo maleeyaa inuu dhacay. Haddii uurka ektoobiga la ogaado oo lagu maareyo habka filashada, jidhku si dabiici ah ayuu dib u nuugi doonaa uurka si la mid ah sida kor ku xusan.

Haddii uurka ektoobiga si guul leh u daweeysa maareynta daawadu, jidhku wuxuu dib u nuugi doonaa uurka si la mid ah maareynta filashada.

Haddii lagugu daweeyo qalliin, isbitaalku waa inuu ku siiyaa ikhtiyaarka ah inuu diyaariyo gubidda ama aasitaanka uurka ama, haddii aad doorbideyso, ikhtiyaarka ah inaad maxsuulka uurka u qaadatid guriga oo aad samayso diyaarintaada gaarka ah. Tani waxa aad ugu kala duwanaan kara isbitaallada. Qaar laga yaaba in ayna ku siin doorasho xasaasi ah oo aasida illaa aad weydiisato mooyaane. Tani sharci darro kama aha England iyo Wales, in kastoo tilmaanta Scottish-ku ay ka duwan tahay. Waa in lagu siiyaa waqti aad ku doorato waxa adiga iyo lammaanahaaga idin fiican.

Dareenkaaga

Waajihidda uurka ektoobiga wuxuu keeni karaa caadifado badan oo kakkann mararka qaarkoodna wareer. Uurka ektoobigu wuxuu keenaa in aad waydo uurkaaga, iyo laga yaabaa qayb ka mida habdhiska tarankaaga (haddii ugxan-mareenka lagaa saaray



intii lagu jiray qalliinka) iyo in aad dhimato (halista in noloshaada aad weydo) oo ay weheliso daaweyn jidh ahaan iyo dareen ahaanba u baahan. Dareennada bilowga ah qaarkood waxaa ka mid noqon kara naxdin iyo uqaadan waa, cabsi, xanaaq, niyad-jab, gargaar waayid, cadho, murugo, dambi, masayr, walaac ama walwal. Waxaa laga yaabaa inaad ogaato in waayo-aragnimadu ay saamaysay lammaanahaaga, cilaaqaadkaaga, rajooyinkaaga iyo qorshayaashaada mustaqbalka, waxaana laga yaabaa inaad aragto adiga oo warka u sheegaya qoyskaaga, saaxiibbadaada, iyo asxaabtaada.

Jir ahaan, ilaa heerarka hCG ay ku soo noqdaan heerarka marka qofku aanu uur lahayn mooyane (oo qaadan kara dhowr toddobaad xitaa qalliinka ka dib), weli waxa laga yaabaa in aad "dareento" uur. Tani waxay noqon kartaa xusuusin murugo leh oo ku xusuusisa dhaawacyada iyo khasaaraha aad la kulantay. Maalmaha iyo toddobaadyada ugu horreeya ayaa laga yaabaa in aad ku mashquusho sookabashadaada jir ahaaneed waana muhiim inaad dedejin xilligan. Qirashada in aysan suurtoagal ahayn in si toos ah loogu laabto hawl maalmeedkii oo aad naftaada siiso waqti aad ku soo kabato ayaa kaa caawin karta in la yareeyo filashooyinka dadku iska qabaan. Waa muhiim inaad naftaada u dabacdo oo aad naftaada u oggolaato waqti aad kaga soo kabato dhinacyada dareenka iyo jir ahaaneed ee uu waxyeellay uurka ektoobigu.

Isku dayga inaad fahanto sababta aad u yeelatay uurka ektoobigu waxay noqon kartaa wax kugu abuura laacwaa maadaama inta badan ay xadidan yihiin ama xitaa aan lahayn jawaabaha su'aalaha. Qaarkood waxay dareemaan dambi waxayna xitaa isku eedeeyaan inay "sababeen" ama gacan ka geysteen uurka ektoobiga. Waxaa muhiim ah in aad qirto in aysan jirin wax aad sameyn kartay si aad u joojiso dhicitaanka uurka ektoobiga iyo in aadan adigu khaladka lahayn. In ka badan kala badh uurka ektoobiga ee Boqortooyada Midowday (UK), ma jirto khatar la og yahay ama waxyaallo keeni karta uur ektoobiga.

Haddi aan nahay Hay'adda Uurka Ektoobigu, waxaan halkan u joognaa inaan ku taageerno. In badan oo naga mid ah waxay soo mareen dhaawac jireed iyo mid shucuureed oo uu sababay uurka ektoobigu sidaa darteed waan fahmaynaa oo u damqanaynaa wax badan oo adiga iyo kuwa aad jeceshahay aad dareemaysan hadda. Waxaa laga yaabaa inaad dareento cidlo, wareer, iyo culays. Waxaa laga yaabaa inaad qabtid su'aalo ku saabsan waayo-aragnimada iyo waxa dhici doona, jir ahaan iyo dareen ahaanba.



Goorma ayaan mar kale galmo samayn karaa?

Haddii lagugu daaweynayo maareyn daawo (methotrexate) ama lagugu maareeyay si filasho ah waa inaad ka fogaataa dhaqdhaqaaq galmo ee ay ka mid tahay is-gelinta labada xubin taran ilaa heerarka hCG (hoormoonka) uu hoos ugu dhaco wax ka yar 5 mIU/mL. Marka heerarka hCG hoos u dhacaan, halista dillaaca ayaa hoos u dhacda laakiin, nasiib darro se, halistu waxay sii jirtaa xitaa heerarka hCG haddii ay yihiin kuwo hooseeya. Sababtaas awgeed, waxqabad kasta oo kordhiya cadaadiska caloosha, sida galmada, ayaa wanaagsan in laga fogaado.

U oggolaanshaha jidhku inuu soo kabto, ugxantu inay soo baxdo iyo caaddada ugu horreysa in ay timaado ayaa inta badan dhakhaatiirtu soo jeediyaan inay tahay xilliga sugitaanka ee ugu habboon ka hor intaan galmo buuxda mar labaad la samayn, taas oo macnaheedu yahay sugitaan ilaa lix toddobaad ah. Tani waxay u oggolaanaysaa muruqyada inay bogsadaan waxayna ku siinaysaa kalsooni dheeraad ah oo in jirkaagu ku soo noqonayo habkiisi caadiga ahaa. Lammaanayaasha qaarkood, siday doonta ha ahaate, waxay dareemaan inay rabaan inay galmo sameeyaan waqtigan ka hor, ugu dambayntiina, go'aanka ku saabsan goorta mar labaad la sameeynayo galmo waa mid adiga iyo lammaanahaaga idin taalla waana inay ku salaysnaataa marka labadiinuba aad dareentaan in aad diyaar tihiin. Dib u soo nooleynta xiriirkii galmo waxay adiga iyo lammaanahaaga ku noqon kartaa mid walbahaar leh waana muhiim inaad waqti isa siisaan oo si daacad ah uga wada hadashaan fekerkiina iyo dareenkiina. Haddii aad doorataan inaad sugtaan, micnaheedu ma aha inaad heli karin siyaabo kale oo aad isugu dhawaataan haddii aad doonaysaan.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in xirfadlayaasha caafimaadku kugula talinayaan inaad uur qaadin laba wareeg oo caadada ah ama saddex bilood kadib uurka ektoobiga iyo, haddii aad rabto inaad galmo sameeyso waqtigan kahor, arrinta ka hortagga uurka ayaa u baahan in la tixgeliyo .

Goorma ayaan filan karaa caadada iigu horreysa?

Dhiig-baxa aad yeelato qalliinka ka dib, ka dib markii lagugu daaweeyo daawada methotrexate, ama haddii lagu sameeyo maareynta sugitaanka, dhab ahaan looma tixgeliyo caadadaadii ugu horreysay ee ka dib uurka ektoobiga. Kani waa jidhkaaga oo soo saaraya dahaadhka qarada weyn ee ilma -galeenka sababta oo ah hadda uur ma lihid.

Caadooyinkaagu waxay qaadan karaan xoogaa in dib loo soo celiyo waxayna dib u



bilaabmi karaan wax kastaa inta u dhaxaysa afar ilaa toban toddobaad daaweynta ka dib. Intooda badan waxay caadadoodu u timaaddaa qiyaastii toddobaadka lixaad ama ka toddobaad qalliinka ka dib, ama haddii lagu daaweeyo qalliin la'aan, waqti ka mid ah toddobaadka afaraad ka dib marka heerarkooda hCG ay hoos uga dhacaan 100 mIU/mL.

Kahor intaadan caado yeelan, sida caadiga ah waa inaad ugxantaa soo saartaa. Waxaa suurto ah in aad ugxanta soo saarto 14 maalmood gudahood ka dib daaweynta qalliinka iyo sida ugu dhakhsaha badan daaweynta methotrexate, sidaa darteed waxaa muhiim ah in lagu baraarugsanaado in ay suurto ah tahay in aad uuraysayn karto adiga oo aan helin caado marka hore haddii aadan isticmaalin nooc ka mid ah qaababka looga hortaggo uurka.

Caadada ugu horreeysaa ayaa laga yaabaa inay ka xanuun badan yahay ama ka xanuun yartahay sidii caadiga ahayd, ka culus tahay, ama ka khafiifsan tahay, ka muddo dheertahay ama ka muddo gaaban tahay sidii caadiga ahayd - dhab ahaantii ma jiro qaab go'ani. Waa inaad awood u yeelatid inaad ku maamusho raaxo-darrada xanuun-jabiyayaasha farmasiyada lagaa soo iibsado oo waa inaad halki xafaayad qoynin wax ka yar saacad. Haddii aysan sidaas ahayn, waa inaad raadsataa daryeel caafimaad.

Goorma ayaan isku dayi karaa inaan mar kale uuraysto?

Kani waa wakhti leh caadifad gooni ah, qaar waxay aad u rabaan inay isku dayaan inay mar kale uur qaadaan kadib uurki ektoobiga halka kuwa kale ay cabsi qabaan oo dareemaan inay u baahan yihiin waqti dheeraad ah si ay u soo kabtaan dareen ahaan iyo jir ahaanba. Qof kastaa si gaara ayuu u murugoodaa mana jirto go'aan sax ah ama khalad ah marka la dooranayo in la sugo ama in si dhaqso ah dib loo helo ilmo kale.

Haddii aad qaadatay mid ama laba irbadood oo ah daawada methotrexate, waa inaad sugtaa ilaa heerarka hCG -gaagu hoos uga dhaco 5mIU/mL (dhakhtarkaagu wuxuu kula talin doonaa marka tani la gaadho isaga oo ka eegi doona hCG-gaaga dhiigga ama kaadida) ka dibna qaado kaabis folic acid ah toddobaadyo ka hor intaadan isku dayin inaad uuraysato. Tani waxa loo samaynayaa sababta oo ah daawada ayaa laga yaabaa inay hoos u dhigto heerka folate-ka ee jirkaaga kaas oo loo baahan yahay si loo hubiyo in ilmuhu u koro si caafimaad qaba.



Goorma ayaan mar kale galmo samayn karaa?

Haddii qalliin lagugu sameeyay, waxay u badan tahay in lagugula taliyay inaad sugto saddex bilood ama laba wareeg oo caado oo buuxa, hadba kii ugu dhakhsaha badan, ka hor intaadan isku dayin inaad uuraysato. Dhiigga soo baxa toddobaadka ugu horreeya ee daaweynta uurka ektoobigu ma aha caadadaadii kowaad. Waa dhiiga soo baxa marka laga jawaabay hormoonnada hoos u dhacaya ee la xiriira uurka lumay. In kasta oo aysan jirin caddayn cad, oo la baaray oo ku saabsan inta ay tahay in lammaanuhu sugaan si ay isugu dayaan inay uuraystaan ka dib marka la daweeyo uurka ektoobiga, annaga iyo xirfadlayaal caafimaad oo kale ayaa ku talinayna in laga yaabo inay ugu wanaagsan tahay in la sugo ugu yaraan saddex bilood ama laba wareeg oo caadado ah (caadooyinka) ka hor intaadan isku dayin inaad uur yeelatid sababo la xidhiidha jirka iyo dareenka labadaba.

Jir ahaan, waqtigan waa in loo oggolaado wareeggaagu inuu caadi ku soo noqdo iyo inay jirto muddo cad oo laga bilaabo taariikhda uurka cusub. Taariikhda maalinta koowaad ee caadada ayaa ah waxa loo isticmaalo go'aaminta goorta la iska baadhayo uur cusub; lagalana soo baxayo macluumaad aad u qiimo badan si loo hubiyo inaad markale qaadin uur ektoobig ah.

Marka lagu daro dhinacyada jirka ee uurka ektoobiga, dad badan ayaa sidoo kale dareema saamayn shucuureed aad u daran. Waqti qaadashada ka hor intaanad isku dayin inaad mar kale uur yeelato waxay suurtoogelinaysaa habka murugada ee lagama maarmaanka ah in la muujiyo oo laga gudbo. Soo-kabashada shucuureed ee inta badan loo baahan yahay waxay noqon kartaa mid muhiim ah oo qaar badan baa dhayalsada dhinacan.

Goorma ayaan ku soo noqonayaa shaqada?

Markaad bilowdo inaad jir ahaan iyo dareen ahaan bogsato kadib uurka ektoobiga, waxaad bilaabi kartaa inaad ka fikirto sida iyo goorta aad shaqada ku noqon lahayd. Haddii qalliin lagugu sameeyay adiga oo isbitaalka ku jira, lagugu daweeeyay daawada methotrexate, ama lagugu maareeyay sugitaan, waxaa muhiim ah in aad naftaada u dabacdo oo aad shaqada ku laabato keliya marka aad diyaar u tahay in aad sidaan samayso.

Dhakhtarkaagu wuxuu kuu soo jeedin karaa inaad fasax ka qaadato shaqada hal, laba, ama xataa saddex/afar toddobaad. Qaar baa laga yaabaa inay u baahdaan



waqti dheer tanina waxay ku xirnaan doontaa nooca daaweynta iyo sidoo kale bogsashada shucuureed ee loo baahan yahay. Tani waa inay noqotaa mid aad kala hadasho dhakhtarkaaga, oo haddii aad dareento inaad u baahan tahay waqti ka badan inta ay kuu soo jeediyaan (xitaa markaad soo saarto warqad fasaxa), waa muhiim inaad u sheegto. Waxa kale oo laga yaabaa inaad rabto inaad kala hadasho loo shaqeeyahaaga ama waaxda Shaqaalaha in aad dib shaqada ugu soo laabato si tartiiba. Tani waxay micnaheedu noqon kartaa in maalintaada ugu horreysa, toddobaadka ugu horeeya ama toddobaadyo yar, laga yaabo inaad rabto inaad kala hadasho ikhtiyaarrada ah inaad shaqayso saacado la dhimay ama aad qaadato nasashooyin dheer.

Qof kastaa waa gooni, qaarkood waxay u arkaan in dib ugu noqoshada shaqada si dhaqso leh in ay ka caawinayso la qabsiga caadiyan cusub ee bogsashadooda kuwa kalena waxay dareemayaan inaysan diyaar u ahayn waxayna u baahan yihiin waqti dheeraada. Soo-kabashada way ku kala duwan yihiin dadku, waana muhiim inaad naftaada u oggolaato waqti ku filan oo aad ku bogsan karto jir ahaan iyo maskax ahaanba daaweynta ka dib.

Maxaan samayn karaa si aan uga hortago uurka ektoobiga?

Nasiib darro, ma jiraan wax la samayn karo si looga hortago in uu dhaco uurka ektoobigu. Fursadaha guud ee uu mar kale kuso noqnoqan karo uurka ektoobiga ayaa ku dhow boqolkiiba 10% tanina way kala duwanaan kartaa iyadoo ku xiran arrimo kale oo shaqsiyeed sida baaxadda dhaawaca soo gaaray ugxan-mareenka iyo arrimaha halista shaqsiyeed sida sigaarka. Si kale markaan u eegno si kastaba ha ahaatee, waxaa jirta boqolkiiba 90% fursad ah in uurjiifku ku jiro ilmo-galeenka uurka danbe.

Waa maxay fursadahayga aan u leeyahay in aan uur bedqaba qaado mustaqbalka?

Tiro-koob ahaan, fursadaha helitaanka uur bedqaba mustaqbalka waa mid aad u wanaagsan oo boqolkiiba 65% haweenku waxay uur caafimaad qaba qaadeen 18 bilood gudahood ka dib uurka ektoobiga. Daraasadaha qaarkood waxay soo jeedinayaan in tiradani kor u kacdo ilaa boqolkiiba 85% 2 sano wixii ka badan. Wakhtiga ay qaadanaayo uur qaadistu iyo fursadaha uurku waxay ku xiran yihiin arrimo badan sida caafimaadka ugxan-mareenka , da'daada, caafimaadkaaga guud iyo taranka iyo inta jeer ee aad galmo samayso.



Maxaan sameeyaa uurkayga xiga?

Haddii aad ogaato inaad mar kale uur leedahay, waxaad la xiriiri kartaa Unuggaaga Uurka Hore (ee af-Ingriisiga loo soo gaabiyo EPU) sida ugu dhaqsaha badan si aad isugu diyaariso baaris hore qiyaastii lix toddobaad marku marayo uurku si aad u hubiso in uurjiifku ku jiro ilma-galeenka. Baadhitaanku wuxuu dhacaa waqtigan maadaama ay jirto fursad macquul ah oo lagu arko uurjiifka marxaladdan.

Waa suurto gal in aad adigu isku dirto baadhista haddii uur ektoobig ahi hore u dhacay. Haddii aadan si toos ah ula xiriiri karin EPU -gaaga, markaa la xiriir dhakhtarkaaga cudurada guud oo weydiiso inay kuu diyaariyaan baaritaan.

Haddii caadadaadu soo daahdo, haddii dhiigbaxa caadadu ka duwan yahay kan caadiga ah ama haddii ay jirto xanuun caloosha oo aan caadi ahayn, waa inaad codsataa in lagu baaro isla marka aad yeelato calaamadahan, haddii loo baahdana, xusuusi dhakhtarka inaad hore u yeelatay uur ektoobiga .